



NY State of Health waxay Dadka Reer New York ku Xirtaa Caymis Caafimaad oo ay awoodi karaan

Waxaan kaa caawinaynaa inaad isku barbardhigto caymisyada caafimaadka iyo inaad hesho caymiska ku habboon adiga iyo qoyskaaga.

NY State of Health waxay bixisaa qorshooyin caymis oo lacag yar ama aan lacag joogto ah la iskaga qaadin, adeegyada kahortaga oo bilaash ah, daryeelka daruuriga ah oo aadan wax lacag ah bixineyn, daawo qorista oo qiimo jaban. Kaalmada maaliyada federaalka la balaadhiyay waxaa loo heli karaa kharashyada caymiska caafimaadka hooseeya ee dad badan oo Reer New York ah.

BARNAAMIJYADA WAXAA KA MID AH:

- 1 Medicaid
- 2 Child Health Plus
- 3 Essential Plan
- 4 Qualified Health Plans

Marka aad iska qorto, macluumaadkaan qof walba oo qoyskaaga ah waa inuu diyaarsado:

- ✓ Taariikhda dhalashada
- ✓ Lambarada amniga bulshada, ama Wixii sharci socdaaleed, lambarada warqaddaha muhiimka ah haddii aad hayso
- ✓ Xogta Shaqada, dakhliga, caymiska caafimaad ee uu bixiyo loo shaqeeyaha/shirkada

Nala soo xariir si aad isku diwaangeliso ama xog badan u oggaato:

- Booqo nystateofhealth.ny.gov
- Wac 1-855-355-5777 (TTY: 1-800-662-1220)
- Caawimaad bilaash ah ka hel Qofka Caawiya Dadka isdiwaangelinaaya. Ka raadi <https://info.nystateofhealth.ny.gov/findassistor>

Xog loogu talagalay Dadka Diiwaangashan

Haddii aad ka diiwaangashan tahay Caymiska Caafimaadka ee ay bixiso NY State of Health, si joogto ah ula soco si aysan kuu dhaafin xogta cusub, oo ay kujiraan goorta ay tahay inaad cusbooneysiiso caymiskaaga.

1 Iska qor barnaamijka Fariimaha Xasuusinta ah.

Si aad iskaga qorto, fariin aad ku qortay START ku dir 1-866-988-0327

2 Cusbooneysii xogta ciwaankaaga.

Xaqiiji in NY State of Health ay hayso ciwaankaaga boostada ee hadda, taleefan lambarkaaga iyo ciwaanka iimaylka si aan kuula soo xariirno marka aan rabno inaaan kaala hadalno caymiskaaga caafimaadka.

- Wac 1-855-355-5777 (TTY: 1-800-662-1220)
- Ciwaankaaga ka gal bartaan nystateofhealth.ny.gov
- La xariir Qofka Caawiya Dadka isdiwaangelinaaya. Ka hel mid bartaan <https://info.nystateofhealth.ny.gov/findassistor/>

3 Marka aad fariin ka hesho NY State of Health, waa waqtiga ay tahay inaad qaado tallaabo la xariirta caymiskaaga caafimaadka.

Fiiri sanduuqaaga fariimaha iyo sanduuqa boostada si aad oga eegto xogta iyo ogeysiisyada muhiimka ah. Raac tilmaamaha oo cusbooneysii caymiskaaga kahor taariikhda kama danbeysta ah ee lagu siiyay.

WAXAAN HALKAAN UJOOGNAA INAAN KUCAAWINO!

NALA SOO XARIIR HADDII AAD QABTO SU'AALO.